



**Returnto  
WorkSA**

# The Return to Work scheme and work injury support Taageerada dhaawaca shaqo iyo qorshaha shaqo ku noqoshada

ReturnToWorkSA waxay bixisaa ceymis ilaalinaya ganacsiyada Koonfurta Australiya iyo shaqaalaha haddii ay shaqada ku dhaawacmaan.

Qorshaha Shaqo ku Noqoshada wuxuu aqoonsan yahay in dadka sida khatarta ah u dhaawacmay ay u baahan yihiin taageero ka duwan kuwaan u dhaawacmin sidaas.

## **Taageerada dadka dhaawacmay waxaa ka mid noqon kara:**

- taageerada dakhliga si ay ugu magdhowdo mushaarka ay waayeen inta lagu jiro xili dhan ilaa laba sanno- guud ahaana ka bilaabanaya taariikhda dhaawaca
- daaweynta caafimaad eel agama maarmaanka ah oo macquulna ah ilaa iyo saddex sanno laga bilaabo taariikhda dhaawacooda
- adeegyada shaqo ku noqoshada sida shaqo ku meelaynta iyo dib u tababarida ilaa iyo saddex sanno laga bilaabo taariikhda dhaawaca.

## **Taageerada dadka sida khatarta ah u dhaawacmay waxaa laga yaabaa inay ka mid tahay:**

- dakhli ka taageerida ilaa iyo da'da hawlgabka
- daaweynta caafimaad ee lagama maarmaanka ah oo macquul ah iyo daryeelka noloshooda oo dhan
- adeegyada shaqo ku noqoshada haddii la codsado.

Haddii dhaawac shaqo dhaco oo ay u muuqato inaad shaqada ka maqnaan doontid wax ka badan laba toddobaad, wakiilkaaga codsiga ayaa iskudeyi doona inuu u diro maareeyaha kiiska si uu u booqdo goobtaada shaqo si uu kuula kulmo adiga iyo loo shaqeeyahaaga si laguula xiriiriyo daaweynta, daryeelka iyo adeegyada taageerada sidii aad ugu baahan tahay si lagaaga caawiyo inaad bogsooto oo aad shaqada dib ugu noqoto sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Booqashooyinkan kafool kafoolka ah ee goobta shaqada waxay u dhici doonaan sida ugu dhakhsaha badan ka dib marka dhaawac la soo wargeliyo.

## What to do if you are injured Waxaad sameynayso haddii aad dhaawacanto.

Haddii aad shaqo ku dhaawacanto waxaa jira dhawr tallaabo oo muhiim ah inaad qaado.

### Tallaabada 1: Doono daaweyn haboon.

### Tallaabada 2: Wargeli loo shaqeeyahaaga

Waa inaad wargelisaa loo shaqeeyahaaga midkood qoraal ama af ahaan haddii ay suurtagal tahay 24 saac gudahood marka dhaawacaagu dhaco. Wakiil sida xubin qoyska ka mid ah ama saaxiib ayaa wargelin karaa loo shaqeeyahaaga haddii aadan awoodin inaad sidaas sameyso.

### Tallaabada 3: Dhakhtar u tag

Dakhtarku wuxuu qiimeyn doonaa dhaawacaaga si loo go'aamiyo dhaawaca ku soo gaaray, nooca daaweynta ee aad u baahan tahay, oo ay ku jirto inta jeer iyo intay qaadaneysa daaweyntu. Waxay ku siin doonaan Shahaadada Awaadaada Shaqo oo aad u baahan doonto inaad siiso wakiilkaaga dalabka loo shaqeeyaha iyadoo uu la socdo foomka dalabku haddii aad u baahan tahay inaad wakhti shaqada ka fariisato oo aad go' aansato inaad codsi sameyso.

### Tallaabada 4: Samee codsi

Haddii dhaawacaagu uu keeno shaqada inaad ka fadhiisato ama kharashaad daawo ama wax kale aad gasho oo aad dooneysid inaad magdhow dalbat, waa inaad buuxisaa foomka codsiga.

Meeshii suurtagal ah, waa inaad la buuxisaa foomka dalabka loo shaqeeyahaaga. Tani waxay ku siinaysaa fursadii aad kala hadli lahayd wixii taageero ah ee loo shaqeeyahaagu uu ku siin karo si uu kaaga caawiyo inaad joogto ama ku laabato shaqada sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah, haddii dhaawacaagu uu kuu ogolaanayo. Waxay sidoo kale ku siineysaa in la bixiyo macluumaad balaaran oo sax ah, oo caawinaya go' aanka codsigaaga. Haddii loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhu aysan awoodin inay foomka wada buuxiyaan, foomka waxaa loo buuxin karaa si kala gaar ah.

Foomka codsiga wuxuu awood kuu siinayaa inuu tilmaamo in codsigaagu ku saabsan yahay kharashaadka daawada, mushahaarka kaa lumay, ama labadaba.

Loo shaqeeyahaaga waxaa laga doonayaa inuu ugu gudbiyo nuqulka foomka codsiga, iyo nuqulka Shahaadada awoodaada Shaqo oo aad ka heli doontid dhakhtarka ku daaweynaya wakiilkooda codsiga shan maalmood oo shaqo gudahood marka lagaa helo adiga.

Wakhtiga hore ee uu ogyahay wakiilka codsiyadu wax ku saabsan dhaawacaaga, waa wakhtiga ugu horeeya ee ay kula xiriirsiin karaan daaweyn, daryeel iyo taageerada si ay kaaga caawiyaan inaad boqsato, oo aad shaqada ugu noqoto sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Si aad codsi u sameyso adiga ama loo shaqeeyahaaga ayaa la xiriiri kara wakiilada codsiyada loo shaqeeyaha:

**Gallagher Bassett Services Pty Ltd**  
GPO Box 1772, Adelaide SA 5001  
newclaims@gb.rtwsa.com  
Fax (08) 8177 8451  
www.gallagherbassett.com.au  
Phone (08) 8177 8450 or free call 1800 664 079

**Employers Mutual SA**  
GPO Box 2575, Adelaide SA 5001  
newclaims@employersmutualsa.com.au  
Fax (08) 8127 1200  
www.employersmutual.com.au  
Phone (08) 8127 1100 or 1300 365 105

Badiba qaybta ururada dawlga ah iyo kuwa gaarka ah ee ugu balaadahn Koonfurta Australiya way isceymiyeen, iyagoo maamulaya codsiyada magdhowga ee shaqaalaha. Haddii aad u shaqeyso ganacsi isceymiyey oo aad ku dhaawacantay shaqada, waa inaad kala hadashaa loo shaqeeyahaaga wax ku saabsan sameynta codisga magdhowga.

## Your obligations Waajibaadkaaga

Si aad ugu hesho bogsiga ugu wanaagsan iyo natiijoyinka shaqo ku noqosho, Waxaan kaa fileynaa inaad:

- soo wargelisid loo shaqeeyahaaga dhaawacaaga shaqo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah (24saac gudahood haddii aad awoodid)
- u sameyso codsi sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah
- si firfircoon uga qayb qaadata nashaadka loogu talagalay inuu taageero bogsigaaga iyo shaqo ku noqoshada
- ka qaybqaado kalana shaqee qorshaha shaqo ku noqoshada
- raacdo waajibaad kasta oo laguugu dejiyo qorshahaaga shaqo ku noqoshada
- keentaa shahaadooyinka caafimaadka oo shaqeynaya kana hadlaya awoodaada inaad shaqeyso iyo wixii macluumaad ah ee kale.
- ku noqoto shaqa haboon markaad awoodo inaad sidaas sameyso.

## Your employer's obligations Waajibaadka loo shaqeeyahaaga

Waxaan ka fileynaa in loo shaqeeyahaagu inuu taageero bogsigaaga iyo shaqo ku noqoshada adoo:

- wargelinaya wakiilkaaga codsiga ee dhaawaca shaqada ama codsiga 5 maalmood gudahood markaad hesho ogeysiiska dhaawaca ama codsiga dhaawaca shaqada
- taageeraya ka qaybqaadashada bogsashada iyo nashaadka shaqo ku noqoshada
- ka qaybgalaya oo kala shaqeynaya sameynta qorshahaaga shaqo ku noqoshada
- raacaya wixii waajibaad ah ee lagu qoray qorshahaaga shaqo ku noqoshada
- siinaya waajibaad haboon oo aad u qaban karto si ammaan ah markaad ka bogsooneyso dhaawacaaga
- bixinta shaqo ku haboon markaad ku haboon tahay si aad shaqo ugu noqoto haddii aadan shaqo ku noqon shaqadaadii dhawacaaga ka horeysay.

## Your support team Kooxdaada taageerada

Dadka soo socda waxaa laga yaabaa inay ku lug leeyihiin inay kaa caawiyaan adiga si aad uga bogsooto dhaawacaaga oo aad shaqada dib ugu noqoto iyo bulshadaba.

### Maareeyaha kiiska

Maareeyaha kiiskaaga ayaa ah qofka koowaad ee aad la xiriireyso oo xiriirin doona adeegyada iyo taageerada aad u baahan tahay si aad uga boqsato dhaawacaaga oo aad si ammaan ah ugu laabato shaqada sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Waxay ku siin doonaan taageero dheeraysa oo shakhsiyeed adiga iyo loo shaqeeyahaaga si loo xiriiriyo adeegyada iyo taageerada u baahan tahay si aad dhaawacaaga uga boqsato oo aad shaqada ugu noqoto sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.

Waxay sidoo kale kaa caawin doonaan adiga iyo loo shaqeeyahaaga inaad sameysaan oo aad dhaqan gelisaan qorshaha shaqo ku noqoshada haddii ay dhici karto inaad shaqada ka maqnaato wax ka badan afar toddobaad.

## Dhakhtar

Dhakhtarkaagu wuxuu qiimeynayaa dhaawacaaga adoo la joogana uu kula go'aaminayaa nooca daawada ah ee aad u baahan tahay. Waxay kaa caawinayaan inaad dejiso ujeedooyinka daaweynta ayna wax ka geystaan horumarinta bogsigaaga iyo qorshaha shaqo dib ugu noqoshaha.

Waa muhiim inaad si firfircoon uga qaybqaadato qorsheynta daaweyntaada si loo hubiyo inaad hesho natiijada suurtagalka ah ee ugu wanaagsan. Oo natiijo ka bixinaya sida daaweyntaadu tahay, waxaad sidoo kale ka caawin kartaa dhakhtarkaaga qorshaha daawada ee ugu haboon xaaladahaaga gaarkaaga.

## Bixiyaha adeegyada caafimaadka la xiriira

Dhakhtarkaaga waxaa laga yaabaa inuu kuu gudbiyo bixiyaha adeegyada caafimaadka la xiriira, oo bixin doona daaweyn, tallo iyo taageero si lagaaga caawiyo inaad u maareyso dhaawacaaga si madax bannaan oo aad dib ugu noqoto nololsha iyo shaqada.

## Adeeg bixiyaha shaqo dib ugu noqoshada

Maareeyahaaga kiiska ayaa laga yaabaa inuu hawlgeliyo adeeg bixiyaha shaqo dib ugu noqoshada si uu kaaga caawiyo shaqo ku meelaynta, tababarka ama takhasuslayaal kale sida dhaqdhaqaaq wax ku daaweeyaha ama fiisiyotarabiistaha si laguugu diyaariyo inaad dib shaqo ugu noqoto.

## Xiriiriyaha Shaqo Dib ugu Noqoshada

Haddii loo shaqeeyahaagu uu shaqaaleysiyo 30 ama ka badan oo shaqaale ah, waa inay leeyihiin Xiriiriye Shaqo Dib ugu Noqosho tababaran si uu kaaga taageero inaad bogsato oo aad shaqada dib ugu noqoto. Xiriiriyahaagu wuxuu awoodaa inuu:

- kaa caawiyo buuxinta foomka codsiga iyo wixii kale ee waraaqo ah
- adiga iyo maareeyaha kiiskaaga idinla kulmo
- kaa caawiyo inaad baaqi ku ahaato ama aad dib ugu noqoto shaqada
- ilaalilo xiriirkiina, wakiilka codsiga iyo daawo bixiyayaasha
- qaado talaabooyin uu kaga hortegayo inaad dib u dhaawacmin ama dhaawac dheeraad ahi ku soo gaadhin
- kaa caawiyo diyaarinta qorshayaasha shaqo dib ugu noqoshada
- la socdo horumarka awoodaada shaqo iyo shaqo dib ugu noqoshada.

Haddii goobtaada shaqadu aysan lahayn xiriiriye, la hadal maareeyaha kiiskaaga oo arag waxay sameyn karaan si ay kuu caawin karaan

## Wixii macluumaad dheeraad ah

Si aad ugula xiriirto ReturnToWorkSA luuqad aan Ingiriis ahayn, fadlan wac Xarunta Turjumaada Afka iyo Qoraalka 1800 280 203 oo weydii inay nagala soo xiriiraan 13 18 55. Adeegan turjumaadu waxaad ku helayaa kharash la'aan.